

Ka ilaali xaydha, dufanka iyo saliidda tuubooyinka



Katir, kaxoq ama kamasax cuntada, saliida iyo xaydha saxamada, digsiyada, taawo oyinka, bircanje eroyinka iyo goobaha shaqada kahor dhaqida. Qabooji marka hore.



Weligaa haku shubin ama haku dhaqin wax saliid ama xaydh ah godka.



Kushub saliida iyo xaydha weelasha wax lagu qaado ee daboolan.



Haku ridin cuntada ama xaydha godka - xitaa haddii uu yaalo weelka qashinka.



Marka hore kudhaq suxuunta iyo digsiyada biyo qabow ka hor intaadan ku ridin mashiinka weelka lagu dhaqo.



Ha ku dhaqin cagasaarka halka ay biyuhu toos ugu qulqulayaan godka.

For reasonable accommodations or alternative formats please call 311 or 612-673-3000.

People who are deaf or hard of hearing can use a relay service to call 311 at 612-673-3000.

TTY users can call 612-673-2157 or 612-673-2626.

Para asistencia 612-673-2700. Yog xav tau kev pab, hu 612-673-2800. Hadii aad Caawimaad u baahantahay 612-673-3500.



Ka ilaali xaydha, dufanka iyo saliida tuubooyinka

Xaydha iyo dufanka tubada makhaayadaada waxay kuu horseedi karaan dhibaato. Xaydha fadhida way xiri kartaa mashiinta weelka dhaqda inta lagu jiro wareegga dhaqida, waxay ku qasbi kartaa bullaacadaha ay kor ubutaacaa, waxayna xitaa burburin kartaa tuubooyinka dhismahaaga - taasoo ku kici karta tobanaan kun oo doolar dayactirka.

Sidaa darted markasta ka ilaali xaydha, dufanka iyo saliidda godadka.

Xaydha gasha dhuumaha ayaa qaali iyo dhibna ku ah milkiilayaasha guryaha..

- Milkiileyaasha guryaha ayaa mas'uul ka ah nadiifinta - iyo bixinta qarashka nadiifinta - oo ay ku jiraan sameynta beddelida lagama maarmaanka u ah nidaamkooda tuubooyinka.
- Makhaayadaha qaarkood oo leh dhibaatooyin xaydha oo daba dheeraaday waxay ku khasbanaadeen inay beddelaan dhammaan tuubooyinkooda gudaha iyagoo ku bixinaya kharash aad u badan.
- Xaydh fadhida ayaa si lama filaan ah u joojin karto mashiinta weelka dhaqdo xilliyada mashquulka badan..
- Xaydha fadhida waxay sababi karaan in bullaacadaha ay kuharan dhismayaasha dhexdooda.
 - Marka bullaacadaha ay kurogmaan goobaha cuntada, waxaa imanaya dhibaatooyin kale sida cuntadoo qasaarta, xiritaanka ganacsiga, wasaqow, sumcadxumo, burburka hantida, wicitaanka degdega ah tuubooyinka iyo beddelaadda wax kasta oo dhulka yaalay.
 - Xaydha ka timaadda goobaha cuntada ayaa sababa in ay xirto guryaha ku dhow oo ay ku kacdo kumanaan kun oo doollar waxyeelada guryaha dhulka hoose.
 - Xirmida bulaacadaha weyn ee magaalada waxay saameyn ku yeelan kartaa dhismooyin badan waxayna sababi kartaa xiranka bulaacada xaafada oo dhan.

Xaydha kujirta nidaamka biyaha ayaa burburin kara qalabka waxayna abuuri kartaa dhibaatooyinka deegaanka. Xaydha ku jirta dhuumaha Magaalada ayaa cashuur-bixiyeyaasha ugu fadhisa kudhowaad \$ 500,000 saddexdii sano ee la soo dhaafay waxayna ka qaadaan ilaha dhaqaale kale ee muhiimka ah.

Dhowr magaalo oo ku yaal Minnesota iyo guud ahaan Mareykanka ayaa horeyba u lahaa sharciyo iyo waxbarasho ka hadlaysa xaydha iyo saliidda gododka iyo tuubooyinka.

HOW CAN RESTAURANTS KEEP GREASE OUT OF THEIR PIPES?

Kudhaji calaamadaha "xaydh la'aan" korka saxanka iyo bullaacadaha

Qaleelka kutirtir dhammaan digsiyo, taawooyinka iyo saxuunta dhaqida kahor.

Si habboon u ilaali dabinnada shaandhada xaydhata

Ku keydi qashinka xaydha weel aamin ah si aad uga hortagto daadashada
Dib u warshadee saliidda wax lagu kariyo ee la isticmaalay si joogto ah.

kunadiifi cagasaarka dhulka godka biyaha ee ku xiran shaandhada
xaydha.

Ku tababar dhammaan shaqaalaha jikada sida habboon ee loo aaso
saliidda iyo xaydha:

- katir, kaxoq ama kamasax cuntada, saliida iyo xaydha saxamada, digsiyada, taawooyinka, bircanjeeroyinka iyo goobaha shaqada kahor dhaqida.
- kushub saliida iyo xaydha weelasha wax lagu qaado ee daboolan.
- Keedi qashinka saliidda si loowarshadeeyo
- Ku dhaq saxamada iyo digsiyada biyo qabow ka hor intaadan ku ridin mashiinka weelka lagu dhaqo. (Biyaha kulul waxay xaga hoose kaxidhaan tuubooyinka)

- Ku dabool bulaacadaha dabaqa shaashado fiican oo qashinka ka kabanee hadba sida loogu baahdo.
- Ku dabool godka jikada qashin saare qashinkana kabanee sida loogu baahdo.
- Weligaa hakushubin xaydh ama saliid godka bulaacada.
- Haku shubin biyo suxuunta, dheriyada, mashiinka wax lagushiilo si aad saliida and xaydha ugu dhaqdid godka.
- Haku ridin higin haraaga cuntada wasakhda - xitaa haddii ay jirto qashin qaadis. Qashinka xaydha wuxuu xiraa dhuumaha